

Heerka 4-aad ee dib u furidda waddanka wuxuu billaabanayaa marka dadka waaweyn oo dhan la tallaalo

Waxay dawladdu go'aamisay in heerka 4-aad ee dib u furidda waddanka la hirgeliyo saddex toddobaad kaddib marka dadka 18 sano ka weyn oo dhan loo fidiyo cirbidda koowaad ee tallaalka. Markaas oo ay dadka norwiijiga ah ee waaweyn oo dhan fursad u heleen in ay tallaal qaataan oo noqdaan kuwo difaacan.

– Toddobaadkan dadka 18 sano ka weyn badankooda waa loo fidiyay in la tallaalo. Taas oo la mid ah in ay saddex toddobaad kaddib si fiican uga difaacan yihiin in ay cudurka aad ugu xanuunsadaan ama u dhintaan. Waxaan doonaynaa in aan dhammaan dadka 18 sano ka weyn fursad u siinno in ay is difaacan ka hor intaan xayiraado kale la sii qaadin, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Waxaa la filayaa in ay kala qaadistu cudurku sare u kacdo marka iskoollada iyo goobaha waxbarashada la furo toddobaadka danbe.

– Saddexda toddobaad ee soo socda waxaan sii wadi doonnaa in aan kala qaadista cudurka xakamayno si aysan faafiddiisu aad ugu kordhin, degmooyinkana aysan aad ugu adkaan hawlaha raadraaca dadka cudurka qaaday. In kasta oo aan tallaal helnay, waxaa la rabaa in aan weli kala fogaanno marka aan bannaanka joogno, in aan guriga joogno haddii aan xanuunsannahay, tijaabo iska qaadno haddii aan calaamado isku aragno, oo gacmuhuna nadiif ahaadaan, ayuu yiri Høie.

– Waxa wacan in qof kasta la soo dego abka Smittestopp oo uu degmadiisa ka caawiyo raadraaca cudurka si cudurkii dillaaca mustaqbalka loo joojiyo, ayuu Høie dadka ku guubaabiyay.

Tallaalka 16- iyo 17-sano jirrada

Tallaalka halka milyan ah ee ay Norway ka soo iibsantayso Booland dartiis ayay tallaalistu si intii hore ka degdeg badan u socon doontaa toddobaadyada soo socda. Taas oo keenaysa in ay dadka waaweyn tallaal buuxa qaataan 2-3 toddobaad ka hor intii marki hore la qiyaasayay.

– Taas ayaa faa'iido weyn leh marka faafidda cudurku korodho dayrta. Waxaan sidoo kale soo hormarinaynaa go'aankii kama danbaysta ahaa ee in 16 iyo 17 sano jirrada la tallaalay iyo in kale, ayuu yir Høie.

Bisha ogoosto gudaheeda ayay dawladdu arrintaas go'aan ka gaaraysaa oo lala sugi maayo sibteembar sidii markii hore qorshuhu ahaa. Waxaa degmooyinka laga codsaday in ay u diyaar garoobaan in kooxdani noqon doonto tan xigta ee la tallaali doono.

– Go'aanka waxaan ku salayn doonnaa aqoonta ugu danbaysa uguna cusub ee loo leeyahay tallaalka dadka da'daan ah. Haddii aan go'aansanno in la tallaalo, tallaalka dheeriga ah ee aan Booland ka soo iibsannay ayaa degmooyinka dadka ugu badan tallaalay u suuragelin doona in ay dhawr toddobaad gudahood ku billaabaan tallaalista 16 iyo 17 sano jirrada, ayuu yiri Høie.

Machadka caafimaadka dadweynaha (FHI) ayaa sidoo kale qiimaynaya in tallaalo loo fidiyo carruurta kuwooda 12 sano gaaray.

– Tallaalistu si wanaagsan ayay hadda u socotaa, wakhti fiican ayaanan ku qaadan karnaa in aan arrintan si wanaagsan uga fikirno ayada oo lagu salaynayo aqoontii ugu danbaysay. Haddii aan ku talinno in kooxdanna la tallaalo, waxaa markaas muhiim noqonaysa in go'aanku ahaado mid ay kalsooni iyo ammaan ku qabaan carruurta iyo waalidkood, ayuu yiri Høie.

Ardayda waa laga dhaafayaa shuruuddii kala fogaashaha marka waxbarashada lagu jiro

Waxyaalo badan oo heerka afraad ee dib u furidda waddanka ka mid ahaa ayay dawladdu xagaagii oggolaatay. Mar kale ayaa haddana wax laga beddelayaa:

Ardayda waa laga dhaafayaa shuruuddii kala fogaashaha marka ay waxbarashadu socoto. Tani waxay ahayd in ay dhacdo heerka afraad ee dib u furidda waddanka, laakiin hadda ayaa la soo hormariyay kaddib markii ay sidaas ku taliyeen Agaasinka caafimaadka iyo FHI.

- Taas oo micnaheedu yahay in ay ardaydu ugu danbayntii fasallada isugu imaan karaan oo ay casharrada is garab fadhiisan karaan, kaddib markii ay sanad iyo bar wax baranayeen ayaga oo kala fog. Toddobaadyada ugu horreeya marka goobaha waxbarashada la furo waxaan ku deeqnay 40 milyan oo karoon, lacagta tijaabada degdegga ahna dawladda ayaa bixinaysa. Waxaan hubaa in waxyaalahaas marka laysu geeyo in ay billowga waxbarashada ee sanadkaan ka dhigayaan mid aad uga farxad iyo ammaan badan kii sanadkii hore, ayuu yiri Henrik Asheim oo ah wasiirka cilmibaarista- iyo waxbarashada sare.

Weli waa in heegan la ahaadaa

Afarta toddobaad ee soo socota dadweynaha badankiisa waa loo fidinayaa cirbaddii labaad ee tallaalka.

- Tallaalku wuxuu naga caawinayaa in aan xakamayno cudurka safmarka ah, laakiin fayraska waa in aan la noolaanno sida aan ula nool nahay cudurrada kale ee la kala qaado. Suurttagal ma aha in khatarta cudurka gebi ahaanba meesha laga saaro. Taas oo keenaysa in ay jiri doonaan dad cudurka aad ugu xanuunsada iyo kuwo u dhinta covid-19 kaddib marka aan tallaalka dhammayno oo bulshada dib u furno, ayuu yiri Høie.

Dawladdu ma sii wadi doonto xayiraadaha waddanka gudahiisa si loo yareeyo khatarka oo eber looga dhigo, laakiin tillaabo ayaa la qaadi doonaa haddii loo baahdo. Waxaa soo bixi kara noocyo cusub oo fayraska ah oo keeni kara in aad loogu xanuunsado, ama waxay noqon karaan noocyo aan tallaalku si fiican wax uga tarayn. Tirada dadka cudurka qaadaya macno badan ma samaynayso ilaa

inta dadka cudurka aadka ugu xanuunsada ee isbataallada la dhigo ay yar yihiin.

– Heerka afraad ee dib u furidda waddanka kaddib waxaan taas darteed geli doonnaa maalmo caadi ah iyo heegan sare. Xaaladda gudaha iyo midda caalamka labadaba isha ayaan ku hayn doonnaa. Hay’adaha dawladda, isbataallada iyo degmooyinka intuba waa in ay heegan lahaadaan oo ay haddii loo baahdo si degdeg ah tillaabooyin u hirgelin karaan, ayuu yiri Høie.

Dawladdu waxay gashay heshiisyo sanaddaha soo socda tallaal lagu keenayo, tallaaladaas oo la waafajin doono noocyada cusub ee fayraska – waxayna gacan ka gaysataa hawlaha tallaalka ee caalamiga ah. Taas ayaa ah qayb muhiim ah oo heeganka ka mid ah.

Waxyaalo laga beddelay xayiraadda soo gelidda waddanka

Laga billaabo saqda dhexe axadda 15-ka bisha ogoosto dadka ay hay’adaha waxbarashada norwiijigu qaateen si ay u diyaariyaan shahaadada phd waxaa loo oggolaanayaa in ay waddanka soo geli karaan. Waa in ay raacaan shuruudaha tijaaba-qaadka iyo karantiilka oo la mid ah kuwa dadka kale ee ka imaanaya dalalka saddexaad.

Is-beddello ayay sidoo kale dawladdu ku samaysay heerka 4-aad ee qorshaha dib u furidda waddanka. Laga billaabo heerka 4-aad waxaa la oggolaanayaa in in ay dalka soo geli karaan awoowayaal/ayeeyooyin, saaxiib/saaxiibad iyo dadka soke ee la midka ah ee ka imaanaya dalalka saddexaad.

– Shuruudo tijaaba-qaad- iyo karantiil oo adag ayay weli mari doonaan marka ay Norway yimaadaan, laakiin waxaa hadda ugu danbayntii loo oggolaanayaa in ay dadkaas ay jecel yihiin Norway ugu yimaadaan. Waxaan ogahay in ay dad badani arrintaan muddo dheer sugayeen, ayuu yiri Høie.